



Madaama oo aadan ahayn qoxooti hada: Digniin, Xuquuq iyo Masuuliyad

Now that you are a U Nonimmigrant: Warnings, Rights and Responsibilities

Xogta warqadan waxaa loogu talo galay dadka aan ahayn qoxootiga (loo yaqaano U Status). Haddii aad tahay dhibane fal-dembiyeed rantana inaad wax ka ogaato xuquudaada, fiiri warqadayada xogta [Victims of Crime and U Visas](#) and [Immigration: Victims of Family Violence](#).

Codssigaygii U Nonimmigrant Status waa la aqbalay. Maxaa xiga?

- **Haddii aad tegantahay Maraykanka marka hay'ada USCIS ay aqbashay codsigaaga, U nonimmigrant status-kaagu wuxuu bilaabanayaa markay Hay'ada USCIS aqbashay codsigaaga.**
- **Haddii aadan deganayn Maraykanka marka hay'ada USCIS aqbashay codsigaaga, waa inaad codsataa dalkugal (visa) oo aad soo martaa Safaarada Maraykanka ama qunsuliyadiisa. Waxaa jira talaabooyin inaad qaado ay tahay, laakiin safaarada ama qunsuliyada waliba si u gaar ah ayay u shaqaysaa. Haddii aad doonayso inaad xog dheeraad ah ka ogaato talaabooyinka, la hadal qareen ku takhasusay sharciga socdaalka.**
 - Haddii safarada ama qunsuliyada Maraykanku ay aqbasho codsigaaga, waxay ku dhajinayaan dalkugalka (U Visa) bog baasboorkaga kamid ah.
 - Markaad timaado Maraykanka, tus dalkugalkaaga iyo baasboorkaaga sarkaalka laanta socdaalka ee Maraykanka, caadi ahaan xuduuda aad kasoo gasho ama garoonka diyaarada aad kasoo degto.
 - Haddi saraakiisha laanta socdaalku kuu ogolaadaan inaad gasho Maraykanka, waxay ku siinayaan dalkugal (U Nonimmigrant Status). Waxaa baasboorka laguugu dhufanayaa shaabad galitaan markaad Maraykanka gasho. Shaabada dalkugalka waxaa ku qoran taariikhda aad soo gashay, mooca dalkugalkaaga, iyo wakhtiga uu kaa dhacayo dalkugalku.



Markaad garoonka diyaarada ka baxdo waa inaad booqataa shabakada www.cbp.gov/194 si aad ula soo baxdo gaarka I-94. Hada kahor, Saraakiisha garoonka diyaaradaha waxay I-94-ka ku dhufan jireen bog kamid ah baasboorkaaga. Laakiin hada masameeyaan, I-94-ku waa aqoonsi muhiim ah oo tusinaya wakhtiga aad soo gashay, dalkugalka aad kusoo gashay, iyo taariikhda uu kaa dhacayo.

Inaad lasoo baxdo I-94-ku waa muhiim. Wa ilaawin talaabadaan. Haddii aad su'aal qabto, lahadal qareen ku takhasusay sharciga socdaalka.

Haddii aad ku qaadatay U visa dibada, markaykanka aadan waligaa soo galin, waligaa kuma imaan kartid U nonimmigrant visa Status.

Waa maxay mudanaha kowaad (principal)? Yaa ah ku mudanaha labaad (derivative)?

Qofka koobaad ee ku yimaada U nonimmigrant waxaa la yiraahdaa "Mudanaha kowaad".

Calaamada mudanaha kowaad ugu qoran warqada aqbalaada, visa-ha, iyo I-94-ka waa **U-1**.

Calaamada mudanaha kowaad ugu qoran kaar shaqada (work permit waa **(a)(19)**).

Mudanaha kowaad qoyskiisa waxaa la yiraahdaa "Derivative" mudanaha labaad.

Calaamada mudanaha labaad ugu qoran warqada aqbalaada, visa-ha, iyo I-94-ka waa **U-1**.

Calaamada mudanaha labaad ugu qoran kaar shaqada (work permit waa **(a)(20)**).

Ma heli karaa Social Security kaar iyo shatiga wadista gaariga?

Haa, waad heli kartaa Social Security iyo Shatiga wadista gaariga ama kaar aqoonsiga. Sida ugu sahlan ee aad u qaadan karto aqoonsigaan waa inaad sugtaa kaarka shaqaalaha iyo shaqaalaynta. Haddii dhibaata ah kala kulanto, la hadal qareen.

Ma shaqayn karaa?

Sharciga ogolaanshaha shaqaalaha ee loo yaqaano EAD ayaa kuu ogolaanaya inaad shaqayso Maraykanka. EAD waxaa kale oo loogu yeeraa Work Permit. Work Permit-ka waxaa ku qoran taariikhda aad bilaabi karto shaqo, iyo taariikhda uu dhacayo ogolaanshaha shaqo.

- Haddii aad tahay **mudanaha kowaad**, Markaynkana aad ku noolayd marka aad heshay deganaansha ha aan qoxootinamada ahayn ee loo yaqaano U nonimmigrant Status, maha inaad u dirsato waraqaha codsiga kaarka shaqada (Work Permit) laanta jinsiyada iyo socdaalka. Waxaa si toos ah kuugu soo dhacaya kaarka shaqaalaha oo 4 sano ah.
- Haddii aad tahay **mudanaha kowaad**, visa ha dalkugalkana lagugu siiyay wadanka dibadiisa si aad Markaykanka ugu gashid, waa in lagu siiyaa kaarka shaqaalaha. Warqad ay ku lifaaqan yihiin sharciyadaadu u dir xafiiska laanta jinsiyada iyo socdaalka ee USCIS qaybteena adeega ee gobol Vermont. Waxaa laga yaabaa inay ka fududahay inaad buuxiso codsiga kaarka shaqaalaha, laakiin qasab ma'aha.



Haddii aad tahay **mudanaha labaad**, waa inaad u dirtaa codsiga kaarka shaqaalaha laanta jinsiyada iyo socdaalka ee USCIS.

- Haddii aad deganayd Maraykanka markii aad codsiga U nonimmigrant status u dirsatay USCIS, waxaad isku mar buuxin kartay codsiga kaarka shaqaalaha markaad ka U nonimmigrant Status-ka.
- Haddii lagugu siiyo U Visa-ha wadanka Maraykanka dibadiisa, kadibna aad wadanka soo gashay, waxaad codsiga kaarka shaqaalaha laanta jinsiga iyo socdaalka USCIS markaad wadanka soo gasho kadib.

Cayr ma qaadan karaa?

Haddii uu dakhligaagu yaryahay, waxaa laga yaabaa inuu kusiiyo kaarka ee gobolka Minnesota. Waxayna ku xirantahay da'daada iyo waxyaabo kale. Haddii aad tahay 50 sano jir ama kaweyntahay, dakhligaaguna yaryahay, waxaa laga yaabaa in lagu siiyo kaarka cuntada. Kala xiriir xafiiska caawinaada dadweynaha ee degmadaada. Gobalada kale waxay leeyihiin mashruucyo kale duwan iyo sharciyo kale duwan. Haddii lagu diido, lasoo xiriir xafiiska Legal Aid oo caawinaad waydiiso.

Maxaa cadaynaya inaan haysto U nonimmigrant status?

- **Haddii aad Maraykanka joogtay markii aad qaadatahay sharciga U nonimmigrant Status:** Laanta jinsiga iyo socdaalka USCIS waxay kuu soo dirtay warqada ogolaansha sharciga U status. Warqada darafkeeda hoose waxaa ku yaala kaarka I-94. Warqadani waxay cadaynaysaa inaad haysato sharciga U nonimmigrant. Kaarka shaqaalaha isaguna waa cadayn inaad haysato sharciga U status.
- **Haddii aad hesho sharciga U visa intaadan soo galin wadanka Maraykanka si aad wadanka ugu soo gasho.** Shaabada dalkugalka, kaarka I-94-ka iyo kaarka shaqaalaha oo kaliya ayaa cadaynaya inaad haysato sharciga U status. waraqda ogolaanshaha ee katimid USCIS iyo visa-ha baasaboorka gu yaala waa muhiim, laakiin ma'aha cadayn inaad haysato sharciga U status.

Goorma ayuu bilowdaa dhaqan-galka sharciga U nonimmigrant?

Goorma ayuu dhamaadaa?

Wadanka Maraykanka waad joogi kartaa inta aad haysato U nonimmigrant status.

- Haddii aad Maraykanka aad joogtay marka lagu siiyay sharciga U nonimmigrant Status:
 - warqada ogolaanshaha sharciga ee USCIS kuusoo dirtay waxaa ku yaala taariikhda uu dhaqan galay sharciga U status, waxaa kale oo ku yaala taariikhda uu dhacayo sharcigu.
 - Sidoo kale kaarka I-94-ka ee darafka hoose ee warqada ogolaansha waxaa isna ku yaala taariikhda uu sharcigu dhaqan qalayo, iyo taariikhda uu dhacayo.
 - Haddii aad haysatid kaarka shaqaalaha, waxaa ku qoran taariikhda uu dhacay sharcigaaga.



- Haddii aad ahayd mudanaha kowaad, waxaa sharciga U nonimmigrant laguusoo dhufanaya shaabad afar sano ah.
- Haddii aad tahay mudanaha labaad, waxaa laga yaabaa in laguugu dhufto shaabad 4 sano ah, ama waxay noqon kartaa ka yar.
- **Haddii aad hesho sharciga U visa intaadan soo galin wadanka Maraykanka si aad wadanka ugu soo gasho.**
 - Shaabada dalkugalka iyo kaarka I-94 waxaa ku qoran taariikhda aad Maraykanka kusoo gashay sharciga U nonimmigrant. Taariikhdani waa bilowgii sharciga U status-ka.
 - Taariikhda uu sharciga U visa uu dhacayo waxay ku qorantahay warqadii ogolaansha ee katimid USCIS, baasboorka, shaabadii dalkugalka, kaarka I-94, kaarka shaqaalaha. Haddii taariikhda uu dhacayo sharcigay aysan iswada waafaqsanayan dhamaan sharciyadan, la hadal qareen ku takhasusay sharciga socdaalka.


Digniin: Haddii mudada sharciga U visa shaqaynayo uu ka yaryahay 3 sano, la hadal qareen tu takhasusay sharciga socdaalka sida ugu dhakhsaha badan.

Qoyskayga ma ku caawin karaa inay helaan visa ama sharci dalku joog.

- **Haddii aad tahay mudanaha kowaad:** Haa, waad u isticmaali kartaa sharcigaaga U status caawinaada qoyskaaga si ay u helaan visa ama sharci. Qoyskaaga aad ku caawin kartid haku noolaadan Maraykanka ama wadan kale. Qoyskaaga waxaa kamid ah qof gadaal kaga so biiray sida haddii aad gursatid. Si aad xog dheeraad ah u heshid, lahadal qareen ku takhasusay sharciga socdaalka.
- **Haddii aad tahay mudanaha labaad:** Maya, uma isticmaali kartid sharcigaaga inaad ku caawiso qoyskaaga. Haddii aad hesho degaansho rasmi ah (green card), waxaa laga yaabaa inaad ku caawisid qoyskaaga markaas kadib. Si aad xog dheeraad ah u heshid, lahadal qareen ku takhasusay sharciga socdaalka.

Haddii aad wadanka dibadiisa u safro, masoo laaban karaa?

- Haddii aad Maraykanka aad joogtay marka lagu siiyay sharciga U nonimmigrant Status: Haddii aad ka baxdo dalka Maraykanka, waa inaad soo codsataa U visa si aad dib ugu laabato Maraykanka. Waxaad ka codsan kartaa U visa safaarada ama qunsuliyada Maraykanka ee dalka aad joogto. Waxaa laga yaabaa inaad waydiisatid laanta socdaalka ee USCIS inay kaa dhaafto inta safaarada ama qunsuliyadu ku siinin visa-ha. La tasho qareen ku takhasusay sharciga socdaalka haddii aad doonayso inaad wax ka ogaato sida loo codsado visa dalkugal ama in lagaa dhaafto oo visa laan aad gasho.



Waxaa kala kulmi kartaa dhibaato inaad dib udu soo laabato wadanka Maraykanka. Tan macnaheedu wuxuu yahay, waxaa laga yaabaa inaan lagu ogolaanin inaad dib u soo gasho. Ama waxaa laga yaabaa in lagugu qasbo inaad mudo dheer banaanka maraykanka ku sugnaatid. Tani waxay kaa hor istaagi kartaa inaad heshid degenaansho rasmi ah. **Haddii ay suurto gal tahay, haka bixin wadanka inta aad ka helaysid degenaansho rasmi ah.** Inta aadan go'aansan inaad wadanka ka baxdo, la tasho qareenka shariciga socdaalka.

- **Haddii aad hesho sharciga U visa intaadan soo galin wadanka Maraykanka si aad wadanka ugu soo gasho.**

U fiirso U visa-ha baasboorkaaga ku yaala. Waxay u badantahay in lagu ogol yahay inaad bixi kartid soona noqo kartid. Haddii visa haaga aad ku bixi kartid kuna soo laaban karid, visa-haas ayaad u isticmaali kartaa inaad dib dalka ugu soo gasho. Umana baahnid visa kale. U fiirso taariikhda ay dhacayso visa haaga. Haddii aad baxdo, waa inaad soo laabato inta aaysan visa hu kaa dhicin.

Digniin: Markasta oo aad wadanka ka baxdo, saraakiisha laanta socdaalka ayaa go'aan kaa gaaraya inaad soo laaban karto iyo inkale. waxay go'aansan karaan inay dhahaan maya markaad xuduuda ama gagida diyaarada aad tagto, xataa hadaad visa haysato. Inta aadan go'aansan inaad wadanka ka baxdo, la tasho qareenka shariciga socdaalka. Qareenku wuxuu kaaga digi karaa khataraha ku sugan socdaalkaaga.

Wakhti intee le'eg ayaan wadanka dibadiisa ku maqnaan karaa?

Mudooyinka dheer ee aad wadanka dibadiisa kumaqnaataa waxay baabi'in karaan fursada aad ku heli lahayd degenaansho rasmi ah.

Digniin:

- Ha aadan safar 90 maalin ka badan.
- Ha aadan safaro sku darkoodu kabanyahay 180 maalin.

Goorma ayaan codsan karaa degenaashaha rasmiga ah?

Markaad haysatid U nonimmigrant status, waxaad codsan kartaa degenaansho rasmi ah 3 sano markaad wadanka ku nooshahay.

Xasuuso: Ka fiiri I-94 kaarkaaga wakhtiga uu bilowday dhaqan galka sharcigaaga. Haddii aad ku timid U nonimmigrant status, I-94 kaarkaagu wuxuu ku yaalaa darafka hoose ee warqada ogolaashaha ee laanta socdaalka ee USCIS. Haddii aad ku timid visa, waa inaad kasoo daabacataa I-94 shaashada www.cbp.gov/I94. Waxaa kale oo aad fiirin kartaa shaabada dalkugalka ee ku taala baasbookaaga wakhtiga uu bilowday dhaqan galka sharcigaaga.

Waa inaad cadayso inaad degenayd Maraykanka 3 sano. Waa inaad laanta socdaalka (USCIS) siisaa dhamaan bogaga baasboorkaaga. Waa muhiim inaad cusboonaysiisaa baasboorkaaga inta uunan dhicin. Haddii uu dhaco inta aadan cusboosiinin, waxay kugu keeni kar taa mushkilad. Haddii aad qaadata baasboor cusub, kii hore ha tuurin ee kaydi waxaa kaa codsan doonta laanta socdaalkee. Haddii aad safar ku tagto maraykanka dibadiisa, kaydi dhamaan I-94 kaarkarkii hore oo dhan.



Kaydi dhamaan wixii sharci ah ee tusinaya inaad 3 sano Maraynka joogtay. waa kuwa tusaale yaal:

- Rasiidkii kiro bixinta
- waraaqaha cadaynaya schoolkii aad dhiganaysay
- Waraaqahii shaqadii aad haysay
- Warqadahii canshuur celinta
- waraaqaha kale oo muujinaysa in aad dalka Maraykanka in ay leeyihiin magacaaga iyo taariikhda iyaga on.



Digniin: Haddii aad haysato U nonimmigrant status in kayar 3 sano, lahadal qareenka sharciga socdaalka.

Goorma ayuu ku egyahay wakhtiga aan codsan karo degaansho rasmi ah?

Waa inaad codsataa degaansho rasmi ah inta uusan kaa dhicin U nonimmigrant status.

Hadana xasuso:

- Haddii aad joogtay Maraykanka markii lagu siiyay sharciga U nonimmigrant status, fiiri warqadii ogolaashaha ee USCIS kuu soo dirtay ama kaarkaaga shaqaalaha oo ka fiiri goorma ayuu kaa dhacayaa U status-kaagu.
- Haddii aad qaadatay U visa kahor inta aadan soo galin Maraykanka si aad ugu soo gashid, warqadii ogolaashaha ee USCIS, U visa ha baasboorka kuyaala, shaabadii dalkugalka, I-94-kaaga, kaarkaaga shaqaalaha waxaa ku qoran wakhtiga uu dhacayo sharcigaaga. Haddii taariikhda uu dhacayo sharcigay aysan iswada waafaqsanayan dhamaan sharciyadan, la hadal qareen ku takhasusay sharciga socdaalka.

Hay'ada socdaalka ee USCIS mararka qaar dadka waxay u samaysaa wakhti kordhin loogu samaynayo U nonimmigrant status. Laakiin sida caadiga ah ma dhacdo. Sidaasi waxay dhacdaa oo kale xaalado gaar ah. Haddii aad doonayso inaad kordhisato wakhtiga U status, la hadal qareen ku takhasusay sharciga socdaalka.

Waxaa kale oo aan u baahanahay inaan ogaado si aan u qaato degaansho rasmi ah?

USCIS waxaa kaliya oo ay kusiinaysaa degaansho rasmi ah haddii ay ku haysato xaalad bilow aadanimo, si qoys aan loo kala qaadan, ama haddii ay bulshada dan u tahay.

Arimo badan ayaa hor istaagi kara fursadahaaga aad ku qaadan karto degaansho rasmi ah. waa kuwan tusaale yaal:

- Galida fal-dembiyeed
- Isticmaalka, gadida, aam haysashada maandooriye mamnuuc ah
- canshuur bixin la'aan
- been u sheegid sarkaal dowladeed
- Sheegashada muwaadinimo Maraykan adigoon ahayn
- Codayn sharci daro ah
- Ku caawin dadka kale inay si sharci daro ah kusoo galaan maraykanka


Waxaa waajib kugu ah inaad caawiso booliska, iyo saraakiisha hay'adaha kale ee dowlada ee baaraya ama dembiga ku oogaya dembiilihii kugu xadgudbay ee sababtiisa in lagu ogolaado U nonimmigrant Status, inaysan suurto gal ahayn ma'ahane.

Haddii aad tahay mudanaha labaad: Isbedelada qaarkood ee noloshada way kaa hor istaagi karaan inaad qaadatao degenaansho rasmi ah. La tasho qareen, haddii aad ka fikiraysid inaad isbedel muhiim ah aad samaysid. Tusaale:

- Haddii isqabtaan mudanaha kowaad ee sharciga oo aad is furtaan waxay kaa hor istaagi kartaa inaad hesho degenaansho sharci ah.
- Haddii aad tahay caruurta mudanaha kowaad, inaad guursataa waxay kaa hor istaagi kartaa inaad qaadatao degenaansho rasmi ah.

Ma inaan caawinaad dalbadaa marka aan codsanayo degenaanshaha rasmiga ah?

Waa fikir wanaagsan in qareenka sharciga socdaalku kaa caawiyo codsiga degenaanshaha rasmiga ah. La tasho qareenka sharciga socdaalka inta aadan codsanin degenaanshaha rasmiga ah.



Ma inaan USCIS u sheegaa haddii aan guuro?

Haa. Waa inaad u sheegtaa hay'ada socdaalka ee USCIS markasta oo aad guurto. Waxaad haysataa 10 maalin inaad ugu sheegto. Haddii aad u baahantahay inaad badasho ciwaanka aad degantahay isticmaal AR-11. Waxaad xog dheeraad ah ka heli kartaa warqadahayaga xogta [Reporting Your Change of Address](#). Waad joojin kartaa soo diritaanka Fomka AR-11 haddii aad qaadatao sharci muwaadinimo.

Warqadaha xogtu waa xog sharci ee ma'aha talo qareen. Arag qareen haddii aad talo rabto. Ha isticmaalin warqadan xogta haddii ay ka weyntahay 1 sano. Nasoo waydii xog wixii cusub, warqado xogta, ama xog sikale u dhigan.

© 2019 Minnesota Legal Services Coalition. Dukumintigaan waa la badan karaa, loona isticmaali kara wixii aan ahayn ganacsi sida arimo shaqsi iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda qoraalkan waa la illaliyay. Waa in ogaysiiskani ku qornaadaa koobi kasta oo laga saaro. In loo koobiyeeyo, ama loo isticmaalo arimo ganacsi waa mamnuuc.